# Xaashida Macluumaadka Ka qaybqaataha Carruurta 10-15 jir ah V9

## 03.10.20

Cudurka COVID-19 waxuu beddelay nolosheena oo dhan. Dugsiyada ayaa laga xiray waddanka oo dhan. Waxaa dad farabadan khasab ku ah in ay guriga ku shaqeeyaan oo aanay dibadda u bixin.  Dad kale ma shaqayn karaan.  Waxaa tan dhammaanteed loogu dadaalayaa si loo joojiyo faafista fayruska iyo jirrada ama xanuunka uu dadka u keeno.

Waxaan adiga kuugu baaqaynaa in aad ka qayb qaadato daraasad cilmibaaris si aan wax dheeraad ah uga baran karno fayruskan.  Waxay tani aqoonyahannada ka caawin doontaa in ay fahmaan sida aan fayruska ugu diidi karno in uu geysto waxyeellada sidaas u badan.  Fadlan akhriso macluumaadkan (Qaybaha 1 iyo 2), kala hadal qof qaangaar ah, markaana go'aanso haddii aad rabto in aad ka qayb qaadato.

**Maxay daraasaddu ku saabsan tahay?**

Daraasaddan cilmibaaristu waxay ku saabsan tahay fayruska cusub ee koronfayrus-COVID-19. Cudurka COVID wuu cusub yahay, markaa waxaa jira waxyaabo aan ka garanayno laakiin waxyaabo farabadan ayaanan ka garanayn.

| MAXAAN HORE UGA OG NAHAY CUDURKA COVID-19 | WAA MAXAY WAXA AANAN KA OGAYN EE AAN RAJAYNAYNO IN ILAALADA FAYRUSKA (VIRUS WATCH) LAGU SOO OGAAN DOONO |
|---|---|
| ✓ Waxaan og nahay in dadka waaweyn ay badi yeeshaan qufac iyo heerkul sare ama xummad marka ay qaadaan cudurka COVID. | ✗ Annagu ma ogin haddii carruurtu ay yeeshaan calaamado cudur oo ka duwan sida calool xanuun, shuban ama dareenka jirrada ama xanuunka. |
| ✓ Waxaan og nahay in cudurka COVID ay dadka qaarkood aad ugu | ✗ Annagu ma ogin tirada dadka yeesha uun jirro ama xanuun sahlan |

| | |
|---|---|
| bukoodeen laakiin in carruurta ay aad iyo aad ugu suurogal yar tahay in ay aad ugu bukoodaan cudurka COVID. | oo u yara eeg hargab ama haddii carruurtu ay cudurka COVID qaadi karaan iyagoo aanan ku bukoonin haba yaraatee. |
| ✓ Waxaan og nahay in jirkeenu uu xasuusto caabuqyada qaarkood si uu iskaga difaaci karo mustaqbalka. | ✗ Annagu ma ogin haddii qaadista cudurka COVID hal jeer ay kuu diidi doonto in aad mar kale qaaddo. |
| ✓ Waxaan og nahay in cudurka COVID uu si aad u fudud u faafi karo. | ✗ Annagu ma ogin inta jeer ee ay carruurtu faafiyaan cudurka COVID. |
| ✓ Waxaan og nahay in dawladdu ay annaga na siisay talo farabadan oo cudurka COVID loogu diido in uu faafo. | ✗ Annagu ma ogin tirada dadka raaci kara taladan. |

**Waa maxay sababta aad u rabtaan in aan anigu ka qayb qaato?**

Daraasadda Ilaalada Fayruska ayaa u baahan in qof walboo ka mid ah reer kaste ay ka qayb qaataan markaa waxaa aad muhiim u ah in lagu daro carruurta iyo dhallinyarada iyo weliba dadka waaweyn.

Waxaan u baahan nahay in aan ogaanno tirada carruurta iyo dhallinyarada ee cudurka COVID qaadda iyo haddii ay caabuqa u fidiyaan dadka kale ee aqalka jooga. Waxay tani ka dhigan tahay in aan annagu rabno in dhammaan dadka reerkaaga ka mid ahi ay ka qayb qaataan.

Waxay tani annaga naga caawin doontaa in aan fahanno sida ay waxtar u leedahay xirista dugsiyadu, muddada loo baahan yahay in la xiro iyo goorta habboon in tan la sameeyo.

**Miyay aniga waajib ama khasab igu tahay in aan ka qayb qaato?**

Maya. Adiga ayaa go'aansanaya haddii aad ka qayb qaadanayso iyo haddii kale. Waqti kaste ayaad daraasadda ka bixi kartaa oo uma baahnid in aad sabab na siiso.

**Maxaan anigu u baahan doonaa in aan sameeyo?**

Daraasaddu waxay ka kooban dhowr qaybood; waxay kuwani kala yihiin:
1) ka warbixinta cudurrada ee internetka iyo macluumaadka kale
2) falanqaynta diiwaannada caafimaadeed ee isbitaallada
3) daraasadda suuf marinta si loo garto haddii dadku ay qaadeen cudurka COVID
4) daraasadda baaritaanka dhiigga si loo garto haddii dadku ay difaac dabiici ah ka dhisteen cudurka COVID.

Waxaan annagu rabnaa in dhammaan reeraha qayb ka ah Ilaalada Fayrusku ay ka qayb qaataan labada qaybood ee ugu horreeya laakiin reeraha qaarkood oo keliya ayaa loo dooran doonaa in ay ka qayb qaataan daraasadaha saddexaad iyo afaraad. Waxaan annagu goor dambe dooran doonnaa reeraha laga marti qaadayo daraasadaha suuf marinta iyo baaritaanka dhiigga si aan iskujir fiican uga helno reeraha taasoo sida ugu fiican noogu sheegi karta sida cudurka COVID uu u saameeyo kooxaha dadka.

1) Bilowga daraasadda, qof qaangaar ah oo reerkaaga ka mid ah ayaa ka jawaabi doona su'aalo adiga kugu saabsan. Waxaan annagu rabnaa in aan ogaanno da'da aad tahay iyo haddii aad qabto xaalado caafimaad sida cudurka neefta ama naqaska.

**Daraasadda ka warbixinta cudurrada ee internetka** - Waqti kastoo qof aqalkaaga ka mid ah uu buko ama jirran yahay oo uu qabo qufac iyo hargab iyo calaamado cudur oo noqon kara cudurka COVID waxuu qofkaasi u baahan doonaa in uu qoro sida uu yahay ama waxa uu dareemayo maalin walboo uu buko. Qoyskaaga ayaa adiga tan kaa caawin kara. Qof qaangaar ah oo aqalkaaga ka mid ah ayaa toddobaad kaste heli doona iimayl lagu weydiinayo in uu sheego haddii qof bukay iyo haddii kale oo uu calaamadihiisa cudurka ku diiwaangeliyo sahamin lagu sameeyo kumbiyuutar. Bishiiba mar, waxaan reerkaaga weydiin doonnaa su'aalaha ku saabsan cudurka COVID-19 ee iyaga muhiim u ah waxaanan si kaste ugu dadaali doonnaa in aan kuwaas ka jawaabno.

2) Waxaan annagu rabnaa in aan **eegno diiwaannadaada caafimaadeed** si aan u diiwaangelinno booqashooyinka takhtarka ama isbitaalka ee la xiriira caabuqyada neefsashada ee laga yaabo in aad u tagtay. Waxaan tan samayn karnaa ilaa 5 sano ka dib marka ay daraasaddu dhammaato. Waxaa tan sabab u ah in aan filanayno in fayruskani uu dib u soo noqdo jiilaal kaste.

3) Reeraha dhammaantood ma ahee, qaarkood ayaa weliba laga codsan doonaa in ay bixiyaan **suufaf la mariyo sanka iyo cunaha** waqtiga jirrada. Tani xanuun ma leh waxayna keentaa in waalid ama masuul uu burush aad u yar soo qaado oo uu aayar ugu xoqo gadaasha ama dhanka dambe ee cunahaaga, ka dibna ku xoqo gudaha sankaaga. Waxaa tan markaa loo diraa aqoonyahanno jooga shaybaar oo ka baari doona cudurka COVID-19 wayna kaydin doonaan si looga baaro caabuqyada kalee neefsashada ee caadiga ah (sida hargabka iyo ifilada).

Waxaan weliba adiga kaa codsan **karnaa** in aad iska qaaddo suufaf farabadan oo la mariyo sanka iyo cunaha maalmo kala duwan marka qof kale oo aqalkaaga jooga uu bukooday ama jirranaa. Waxay tani annaga noo sheegi doontaa sida u dhakhso badan ee fudud ee uu cudurka COVID-19 ugu kala fido qofba qofka kale iyo inta jeer ay dadku qaadaan cudurka COVID iyagoo aanan ku bukoonin.

4) Waxaan weliba adiga kaa codsan **karnaa** in aad bixiso qayb yar oo dhiig ah labo jeer oo kaladuwan (Qiyaas ahaan 3 qaaddo yar oo buuxa - 15ml). Waxaan annagu isticmaali karnaa boomaato dareenka saarta si aadan in badan u dareemin mudista irbadda. Muunaddan dhiiggu waxay annaga waxyaabo muhiim ah nooga sheegi

doontaa sida uu nidaamka difaaca dabiiciga ah ee jirkeenu uga jawaab celiyo cudurka COVID-19 iyo caabuqyada kale ee neefsashada iyo muddada laga yaabo in uu socdo difaacan ama dhawritaankan. Baaritaankan dhiigga waxaa lagu samayn doonaa ama kiliniigga takhtarka ama isbitaal ama gurigaaga.

Haddii aadan rabin in aad bixiso muunad dhiig, waxaan kaa codsan karnaa in aad taas halkeeda bixiso muunadda farta lagu mudo. Waxaa tan lagu sameeyaa mudista yar ee fartaada iyo dhibic dhiig oo lagu qaado warqad yar oo biyaha nuugta oo ku jirta qalabka baaritaanka unugyada difaaca jirka. Muddo 10 daqiiqo ah gudaheed waxuu baaritaanku noogu sheegi doonaa haddii laga yaabo in aad waqti hore qabtay cudurka COVID-19.

5) Waxaan weliba adiga kaa codsan **karnaa** in aad bixiso muunadaha farta lagu mudo sida kuwa kor ku sharraxan 2 toddobaad ka dib marka qof reerkaaga ka mid ahi uu yeeshay calaamadaha cudurka COVID-19.

**Adiga waajib ama khasab kuguma aha in aad dhiig bixiso adiga ayaa gebi ahaan ikhiyaar u leh taas go'aankeeda waxanaad weli ka qayb qaadan kartaa daraasadda haddii aad doorato in aadan dhiig bixinin.**

**Muddo intee leeg ayay daraasaddani socon doontaa?**

Daraasaddani waxay socon doontaa ilaa guga sanadka xiga (2021).

**Maxaa dhacaya haddii aan su'aalo dheeraad ah qabo?**
Haddii aad su'aalo dheeraad ah qabto qof qaangaar ah ayaad weydiisan kartaa in uu annaga iimayl noogu soo diro halkan: viruswatch@ucl.ac.uk

**Waad ku mahadsan tahay inta aad akhrisatay Qaybta 1.**

**Qaybta xigta waxaa ku qayaxan sida loo isticmaali karo macluumaadka adiga kugu saabsan.**

**Xaashida Macluumaadka Ka qaybqaataha Carruurta ah Qaybta 2**

- **Miyaa sir lagu hayn doonaa ka qaybqaadashadayda daraasadda?**
  Haa. Dhammaan macluumaadka hoggaamiyaha reerkaagu geliyo sahaminnadayada waxaa toos loo gelin doonaa kumbiyuutarrada xiran ee UCL (Hoyga Nabadda Xogta (Data Safe Haven)). Aragga ama isticmaalka xogta shakhsi ahaaneed ee loo isticmaali karo si loo soo ogaado cidda aad adigu tahay waxaa si adag loogu xadayn doonaa oo uu u furnaan doonaa oo keliya dad tiro yar oo ka mid ah cilmibaareyaasha tababbaran ee UCL. Macluumaadka dadka lagu garto (sida lambarrada adeegga NHS iyo magaacda) waxaa lagu hayaa kayd xog gooni ah, oo ka durugsan xogta ku saabsan caafimaadkaaga, natiijooyinkaaga baaritaanka, ama macluumaadka kale ee lagu soo guro sahaminta. Dhammaan shaqaalaha ka shaqaynaya mashruucan waxaa sharci ahaan waajib ku ah sir ilaalin ay ku dhawraan macluumaadka shakhsi ahaaneed ee ku saabsan shakhsiyaadka. Dhammaan shaqaalaha ku shaqaynaya xogta waxaa si gaar ah looga tababbaray sida xogta loogu ilaaliyo sirta iyo amniga.

  Macluumaadka oo dhan waxaa lagu soo guri doonaa oo lagu kaydin doonaa hab waafaqsan shuruucda dhawrista xogta. Siyaasadda UCL waxay tahay in xogta la kaydiyo ugu yaraan 10 sano. **Haddii reerkaaga laga marti qaado in uu ka qayb qaato Daraasadaha 3 iyo 4** waxaan annagu u baahan karnaa in aan dad kale la wadaagno qaar ka mid ah macluumaadka adiga kugu saabsan. Macluumaadkan waxaa ka mid ah magacaaga, cinwaankaaga, taariikhdaada dhalashada iyo jinsigaaga. Shaybaarka ayaa macluumaadkan u baahan si ay ugu suurtogasho in ay ogaadaan oo ay baaraan muunadaha ama qaybaha adiga lagaa qaado oo ay waalidkaaga ama masuulkaaga dib ugu soo diraan natiijooyinkaaga baaritaanka. Kalkaaliyeyaasha caafimaadka cilmibaarista adeegga NHS/shirkadda dhiigga qaadda ee khaas ahaan loo leeyahay ayaa macluumaadkan u baahan doona si ay u qorsheeyaan ballamaha lagu qaado dhiigga waxaana macluumaadkan u baahan doonta shirkad isku ururisa oo boostada reerkaaga ugu soo dirta baakadka qalabka daraasadda.

  **Ogaysiinta Sirta Dhawrista Xogta Kooban:**
  Waxaa mashruucan maamule u noqon doonta jaamacadda University College London (UCL). Sarkaalka Dhawrista Xogta (Data Protection Officer) ee UCL ayaa kormeeraya ama dusha ka ilaalinaya waxqabadyada UCL ee ay ka mid tahay ka shaqaynta xogta shakhsi ahaaneed, waxaana lagala xiriiri karaa halkan dataprotection@ucl.ac.uk
  Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida UCL ay u isticmaasho macluumaadka ka qaybqaateyaasha ee dadka ka qayb qaata daraasadaha cilmibaarista caafimaadka iyo daryeelka, guji https://www.ucl.ac.uk/legal-services/privacy/ucl-general-privacy-notice-participants-and-researchers-health-and-care-research-studies

Macluumaadka loo baahan yahay in ka qaybqaateyaasha lagu siiyo shuruucda dhawrista xogta (GDPR iyo DPA 2018) waxaa lagu bixiyaa ogaysiimaha sirta ee 'kooban' iyo 'guud' labadoodaba. Rukhsadda sharciyeed ee dhanka UCL laga adeegsado si looga shaqeeyo xogta shakhsi ahaaneed ee daraasaddan waxay soo hoos gashaa Qodobka 6(1)(e) "hawsha shacabka" iyo Qodobka 9(2)j "ka shaqaynta waxaa loogu baahan yahay ujeeddooyinka xasuus dhigga ee dan u ah shacabka, ujeeddooyinka cilmibaarista sayniska ama taariikhda ama ujeeddooyinka tirakoobka". Xogtaada shakhsi ahaaneed waxaa laga shaqayn doonaa waqtiga ama inta loogu baahan yahay mashruuca cilmibaarista. Haddii aan annagu magaca ka saari karno ama magac been been ah u yeeli karno xogta shakhsi ahaaneed ee aad bixiso tan waan fulin doonnaa, waxaanan ku dadaali doonnaa in aan sida ugu yar uga shaqayno xogta shakhsi ahaaneed mar kastoo suurogal ah.
Haddii aad ka walaac qabto sida looga shaqeeyo xogtaada shakhsi ahaaneed, ama haddii aad rabto in aad annaga nagala soo xiriirto xuquuqdaada, fadlan marka hore UCL kala soo xiriir halkan data-protection@ucl.ac.uk. Haddii aadan weli qanacsanayn, waxaa kuu furan in aad la xiriirto Xafiiska Xubinguddiga Macluumaadka (Information Commissioner's Office) (ICO) (https://ico.org.uk/concerns/handling/).

## Waa maxay xulashooyinka adiga diyaar kaaga ah sida macluumaadkaaga loo isticmaalo?

- Waxaad waqti kaste joojin kartaa ka qaybqaadashada daraasadda, adigoo aanan sabab bixinayn, laakiin waxaan hayn doonnaa macluumaadka adiga kugu saabsan ee aan hore kaaga qaadnay.
- Haddii aad doorato in aad joojiso ka qaybqaadashada daraasadda, waxaan rabnaa in aan sii wadno in aan macluumaadka ku saabsan caafimaadkaaga ka soo gurno diiwaannada dhexe ee adeegga NHS. Haddii aadan rabin in tan la sameeyo, noo soo sheeg waanan joojin doonnaa.
- Waxaan annagu u baahan nahay in aan habab gaar ah ku maamulno diiwaannadaada si cilmibaarista loogu kalsoonaan karo. Waxay tani ka dhigan tahay in aanan annagu adiga kuu oggolaan karin in aad aragto ama wax ka beddesho xogta aan adiga kaa hayno.
- Haddii aad oggolaato in aad daraasaddan ka qayb qaadato, waxaad fursad u yeelan doontaa in aad ka qayb qaadato cilmibaarista mustaqbalka oo loo isticmaali doono xogtaada lagu kaydiyey daraasaddan.

## Halkee ayaad ka heli kartaa war dheeraad ah oo ku saabsan sida macluumaadkaaga loo isticmaalo?

War dheeraad ah oo ku saabsan sida aan annagu macluumaadkaaga u isticmaalno waxaad ka heli kartaa

- halkan www.hra.nhs.uk/information-about-patients/
- bartayada internetka daraasadda www.ucl-virus-watch.net
- marka aad weydiiso qof ka mid ah kooxda cilmibaarista
- marka aad iimayl u dirto maamulaha daraasadda (study manager) **viruswatch@ucl.ac.uk**

- **Maxaa dhacaya haddii aanan ku faraxsanayn sida loo qabto daraasadda?** Waxaan annagu isku daynay in aan daraasadda inta suurogalka ah u fududayno dadka ka qayb qaadanaya, haddii aad cabasho ka qabto habka adiga laguula dhaqmay tan wax ayaa laga qaban doonaa. Haddii aad rabto in aad ka cabato qabashada ama hawlgalka daraasadda fadlan qof qaangaar ah oo ka mid ah reerkaaga weydiiso in uu la xiriiro maamulaha daraasadda, oo laga helayo halkan UCL Department of Epidemiology & Public Health (Waaxda Baarista cudurrada safmarka & Caafimaadka Dadweynaha ee UCL), 1-19 Torrington Pl, Fitzrovia, London WC1E 7HB ama iimayl loogu diro viruswatch@ucl.ac.uk. Haddii aadan weli faraxsanayn waxaad cabashadaada u qaadi kartaa Guddiga Anshaxa UCL oo aad kala xiriiri karto halkan: ethics@ucl.ac.uk oo nuqul uga dir research-incidents@ucl.ac.uk.

- **Waxyeellada:** Iyadoo aanan la filanayn haddii ay dhacdo in uu dhaawac kaaga yimaaddo ka qaybqaadashada, magdhaw ayaa lagu siin karaa laakiin waxaa waajib kugu noqon karta in aad bixiso kharashkaaga sharciyeed. Haddii aad ku tuhunsan tahay in dhaawacu uu ka yimid dayacaadda ama taxaddar la'aanta Kafaala qaadaha (University College London), markaa waxaa adiga kuu suurtogeli karta in aad magdhaw dalbato. Fadlan qof qaangaar ah oo reerkaaga ka mid ah weydiiso in uu dalbashada ama dacwadda qoraal ugu diro Professor Andrew Hayward oo ah Baaraha Ugu sarreeya (Chief Investigator) ee tijaabada caafimaadeed/ daraasadda waxuuna joogaa halkan UCL 1-19 Torrington Place. Baaraha Ugu sarreeya ayaa markaa dalbashada u gudbin doona Kafaala qaadaha ka dibna Shirkadda caymiska Kafaala qaadaha. Weliba, qaababka cabashooyinka Adeegga Caafimaadka Qaran (National Health Service) ee caadiga ah ayaa weli adiga diyaar kuu ahaan doona (marka habboon).

**Waad ku mahadsan tahay inta aad akhrisatay Qaybta 2.**